**Xafiiska Maamulka Dacwad Dhagaysiga ee Gobolka Washington**
Waxa aanu si madax banaan u xalinaa khilaafaadka maamuleed iyadoo loo maraayo habraacyo marin loo heli karo, cadaalad ah, oona dhakhso ah iyo bixinta go'aamo wanaagsan.

## Maxaa dhacaya Markaad Codsato Caawimada Dacwad Dhageysiga Dadweynaha?

Koox ayaa laga yaabaa inay codsato dacwad dhageysi marka Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services, DSHS) ay isku daydo inay diidaan, beddelaan, ama dhameeyaan dheefaha. Dacwad dhagaysiga waxaa ku qabta garsoore madax banaan oo dhexdhexaad ah Xafiiska Maamulka Dacwad Dhagaysiga (Office of Administrative Hearings, OAH).

OAH waxay boosta kuugu soo diri doonaa Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga oo leh taariikhda, saacada, iyo goobta dacwad dhagaysigaaga. Celcelis ahaan, dacwad dhegaysiyadu waxay socdaan ilaa 30 daqiiqo.
(Qorshayso ilaa 60 daqiiqo.)

**U sheeg OAH markaaba hadii cinwaankaaga ama taleefan lambarkaaga isbeddel ku imaado.**

## Sida La Isugu Diyaariyo Dacwad Dhageysigaaga

Waxa aad ku matali kartaa naftaada dacwad dhagaysiga ama waxa aad dooran kartaa looyar ama qof kale inuu ku matalo. (Waxaa laga yaabaa inaadan dooran shaqaalaha DSHS). Adiga ayaa mas'uul ka ah kharash kasta oo uu kugu dalaco qareenkaaga.

DSHS waxaa laga yaabaa in uu matalo iskuduwaha dacwad dhegeysiga maamul. Isku duwaha ayaa boostada kuugu soo diri doona xirmada dacwad dhegeysiga oo ay ku jiraan dukumeentiyo aad bixisay adiga iyo DSHS. Si taxadir leh u akhri xirmada dacwad dhagaysiga oo waa inaad soo qaadataa wakhtiga dacwad dhagaysiga.

**Soo Gudbinta Dukumentiyada (Dukumeentiyada Taageerada):** Haddii aad hayso dukumeentiyo aad rabto in garsooruhu arko, isla markiiba u dir OAH iyo DSHS.

Tusaalooyinka dukumeentiyada laga yaabo inaad rabto in garsooruhu arko:

- Ogeysiiska ay DSHS kuu soo dirtay ee kugu dhaliyay inaad codsato dacwad dhageysi.
- Dukumeentiyada muujinaya in sheegashooyinkaadu ay sax yihiin.
- Caddeynta xaalad kasta oo gaar ah ama mid dhaqaaleed oo aad rabto in laguu tixgeliyo.
- Dukumeentiyada ay DSHS kuu sheegay inaad u baahan tahay inaad tusiso garsoorka OAH ma aqbali karto dukumeentiyada cabbirkoodu yahay 2.0 gigabites (GB) ama wax ka weyn. OAH waxay diidi doontaa dukumeenti kasta oo cabbirkiius yahay 2.0 GB ama wax ka weyn.
- OAH waxay ku aqbali kartaa dukumeentiyada taageerada ee muuqaal ahaanta ah qaababkan soo socda: .mp4, .avi, .mpg, .mpeg. OAH waxay diidi doontaa dukumeentiyada taageerada ee muuqaalka ah ee lagu soo gudbiyo qaab kasta oo kale.
- OAH waxay ku aqbali kartaa dukumeentiyada taageerada ee maqalka ah qaabkan soo socda: .mp3. OAH waxay diidi doontaa dukumeentiyada taageerada ee maqalka ah ee lagu soo gudbiyo qaab kasta oo kale.

**Dacwad dhageysigaagu wuxuu ku dhici karaa:**

- **Wicitaan taleefoon ahaan ama**
- **Qof ahaan iyadoo loo soo xaadiraayo**

**Ogeysiiska Dacwad Dhegeysigu wuxuu sharxayaa sida looga qaybgalo.**

Hadii aad u baahan tahay turjubaan, OAH ayaa kusiin doonaa mid si bilaash ah.  Hadii aad qabto laxaad la'aan waxa aad dalban kartaa wax horay u sii qabanqaabin kaa caawisa inaad ka qayb gasho dacwad dhagaysiga.  Waxa aad dalban kartaa turjubaan ama wax horay u sii qabanqaabin adiga oo ka wacaya xafiiska OAH lambarka ku yaal Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga.

Haddii aad u baahan tahay inaad codsato in wax laga beddelo wakhtiga ama taariikhda dacwad dhegaysigaaga, la xidhiidh isku-duwaha dacwad dhegaysiga maamuleed iyo OAH sida ugu dhakhsaha badan. Kaliya garsoorka ayaa bixin kara wax ka badalka jadwalkaaga wakhtiga dacwad dhagaysiga.  Kahor intaan go'aan la gaarin, garsooruhu wuxuu rabi doonaa inuu ogaado haddii DSHS ay ogolaaneyso ama diideyso codsigaaga.

- Garsoorku waxa uu diidi doonaa dalabkaaga hadii aanad haysan sabab wanaagsan.
- Hadii uu garsoorku uu badalo wakhtiga dacwad dhagaysigaaga, xafido xirmada si aad u isticmaasho wakhtiga dib loo qabanayo balanta dacwad dhagaysiga.
- Haddii aad u heleyso dheefaha si aan joogsi lahayn ilaa uu ka soo baxay go'aanka dacwad dhagaysiga, oo aad codsato in dib loo dhigo taariikhda dacwad dhagaysiga, wakiilka DSHS waxa uu waydiisan karaa garsooraha dacwad dhagaysi si uu ugala hadlo bal in dheefahaagu sii socon doonaan iyo in kale.

Waxaad xaq u leedahay in aad la qabsato dacwad dhageysi qof ahaan loo soo xaadiraayo garsooraha.  Hadii aad doonayso inaad badasho sida loo qabanayo dacwad dhagaysigaaga waa inaad la xidhiidhaa xafiiska OAH ee ku yaala dukumeentiga Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga.

Haddii aad xiisaynayso inaad samayso baaritaan sharci, linkiyada ayaa laga heli karaa barta www.oah.wa.gov iyo www.washingtonlawhelp.org.

**Ka fiirso muuqaal tusaale dacwad dhageysi OAH ah barta**
**www.oah.wa.gov**
(Waxaa lagu heleyaa Ingiriisi iyo Isbaanish)

Waa kuwan ikhtiyaaro lagu yaraynayo kharashka kaalmada sharciga:

| Magaca Kheyraadka/Agabka | Lambarka Telefoonka | Websaydka |
|---|---|---|
| CLEAR: Degmada King | Wac 211 | www.wa211.org/region/king-county/ |
| CLEAR: Ka Baxsan Degmada King | 888-201-1014 | |
| Mashruuca Ciidanka Hawlgabay | 855-6578387 | http://nwjustice.org/veterans |
| WA State Bar Association (Ururka Qareenada ee Gobolka WA) | | https://www.wsba.org/for-the-public/find-legal-help |

**Waxaad la xiriiri kartaa isku duwaha dacwad dhageysiga maamul ee DSHS haddii aad rabto inaad isku daydo inaad xalliso kiiskaaga ka hor wakhtiga dacwad dhegeysiga, ama haddii aad su'aalo ka qabto xeerarka.  Isku-duwahu kuma siin karo talo sharci.**

## Sida Looga Qeybqaato Dacwad Dhagaysigaaga

**Dhageysiga taleefoon ahaanta ku dhacaya:** Raac tilmaamaha ku qoran Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga. Haddii aadan ka soo muuqan dacwad dhageysiga ama aadan ka soo qaybgelin, waxaa laga yaabaa inaad waayi doonto xaqa aad u leedahay dacwad dhegaysiga.

- Ogeysiisku waxaa laga yaabaa inuu ku faro inaad bixiso lambar taleefan oo lagaala soo xidhiidhi karo. Ogeysiiska waxaa laga yaabaa inuu ku siiyo koodhadhka soo wacitaanada ee u gaar ah kiiskaaga.
- Waa inaad heystaa taleefoon leh intarneet/hawo wanaagsan.

- Fadlan ogsoonaw inay qasab kugu tahay inaad qabato wicitaanada ka imaada aqoonsiyada soo wacayaal ee la xanibay.

**Dhageysiga la soo xaadirayo:** Aad goobta dacwad dhegeysiga ugu yaraan 10 daqiiqo ka hor.  Tus Ogeysiiskaaga qofka jooga goobta soo-dhaweynta.  Haddii aadan ka soo muuqan dacwad dhageysiga ama aadan ka soo qaybgelin, waxaa laga yaabaa inaad waayi doonto xaqa aad u leedahay dacwad dhegaysiga.

- La imaaw dukumeentigaaga goobta dacwad dhageysiga.

Hadii aad qorshaysato inaad isticmaasho markhaati, waxeey markhaati furi doonaan wakhtigaaga dacwad dhagaysiga.  U sheeg markhaatiga saacada iyo taariikhda dacwad dhagaysiga iyo sida uu uga qayb galayo.

- Markhaatigu wuxuu raaci doonaa isla tilmaamaha ku jirta Ogeysiiska (isagoo bixinaya lambarka taleefoon ee meesha lagala xiriiri karo, isagoo isticmaalaya koodhka wacitaanka, ama aadaya goobta dacwad dhageysiga).
- Haddii ay taleefoon ahaan kaga qaybqaataan, u sheeg markhaatiga in talefankooda laga rabo inuu lahaado intarneet/hawo wanaagsan iyo in telefoonkoodu awood u yeesho in laga soo waco aqoonsiga soo wace la xanibay.  Hayso lambarka markhaatigaaga lagala xidhiidhi karo.

Garsoorku waxa uu duubi doonaa dacwad dhagaysiga.  Garsoorku waxa uu ku bilaabi doonaa inuu u sheego arrinka dhinacyada oo waxa uu u sharixi doonaa waxa dhici doontaa inta lagu jiro wakhtiga dacwad dhagaysiga.  Garsoorka waxa uu naqdin doonaa xirmada dacwad dhagaysiga (iyo waraaqaha kale ee la heley) oo waxa uu go'aamin doonaa wixii cadaymaha la gelinayo.

Isku-duwaha dacwad dhegeysiga maamul ayaa inta badan soo bandhiga kiiska DSHS marka hore.  Dhinac kastaa waxa uu u yeeri karaan markhaatigooda oo waxa ayna su'aalo waydiin karaan markhaatiga dhinaca kale ay u yeedheen.  Markhaatiyadu waxa uu marag furi doonaa ama wax cadeyn doonaa isaga oo la dhaariyay.  Garsoorka ayaa sidoo kale su'aalo waydiin kara.

Dacwad dhageysiga ka dib garsooruhu wuxuu gaari doonaa go'aan kaas oo laguu soo diri doono boostada ku dhawaad 16 maalmood ka dib xiritaanka diiwaanka dacwad dhageysiga.

Hadii aanad ku qancin go'aanka, tilmaamaha racfaan ka qaadashada go'aanka ayaa ku ooli doonaan dhamaadka amarka garsooraha.